# Qorshaha barbaarinta hore ee ilmaha VASU

- Waxaa loo sameeyaa dhammaan carruurta ku jirta barbaarinta hore.
- Waxaa loo sameeyaa si wadajir shaqaalaha iyo waalidiinta.
- Rabitaanka ilmaha iyo baahiyihiisa shakhsiga ah waa la tixgeliyaa.



- Waxa uu noqon karaa warqad ah ama dijitaal.
- Waa dukumenti qarsoodi ah oo la ilaaliyo.
- Hirgelintiisa waxaa la raacaa oo la hubiyaa si joogto ah.
- Waxaa la cusboonaysiiyaa ugu yaraan hal mar sannadkii.

Tampereen ammattikorkeakoulu TAMPERE Pirkanmaan hyvinvointialue

Euroopan unionin osarahoittama

## WADAHADALKA VASU:

- Kulanka macallinka barbaarinta hore iyo waalidiinta ee lagu diyaarinayo vasu-ga.
- Waxaa lagu qabtaa xannaanada.
- Waxaa suuragal ah in la isticmaalo turjubaan.
- Wuxuu qaataa qiyaastii hal saac.

## VASU-GA WAXAA LAGU QORAA:

- Awoodda ilmaha iyo waxyaabaha uu xiiseeyo.
- Aragtida iyo rajada waalidiinta ee ku saabsan tarbiyadda ilmahooda.
- Yoolalka shaqaalaha ee taageeraya wanaagga iyo waxbarashada ilmaha.
- Baahiyo taageero oo suuragal ah.
- Arrimo kale oo ay isla garteen shaqaalaha xannaanada iyo waalidiintu.

## SIDEE LOOGU DIYAARGAROOBAA WADAHADALKA VASU?

- Hore uga fikir waxa aad rabto inaad ka hadasho.
- Maxaa ilmahaagu jecel yahay inuu ku sameeyo guriga?
- Maxaa farxad geliya ilmahaaga?
- Ma jirtaa wax ka murugaysiiya ama ka cabsi geliya ilmahaaga?
- Maxaa rajeyn iyo dalab kaaga ah oo aad u qabto xannaanada ku saabsan ilmahaaga?